**Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 195 ee 7 Setember ee 1967**

**Xadeynta Xeernidamiyaha ee Howlaha Dhaqaalaha ee Dalalka Dibedda**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay 85 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qod. 18 iyo 20 ee D.L. ee 26 Setember 1964 oo loo beddeley lamba. 8 ee Sharciga 29 Oktoobar 1964 oo la xiriira ee Howlaha dhaqaalaha ee dalalka dibedda;

Kadib markii la garowsaday in dalka la keeno macdanta birta, matoneellada, lamiyeeriga, tuuboyinka, birta aan laga shaqeeynin,ee baahida ka jirta;

Kadib markii la tixgeliyey in la keero birta xadiidka ah iyo biiraha aan weli laga shaqeynin liiska alaabaha shatiga la keeni doono;

Kadib markii la dhegestay soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Golaha Wasiirka.

## WAXAA LA SOO SAARAY

### Qod. 1

Keenista birta, ajaayada, xadiidka, waxaa loo baahan yahay in shati ay qaataan.

### Qod. 2

Dekreetadaani waxay hirgeli doonta maalinta ku xigta maalintii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah oo lagu keydiyo Faafinta Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Dowladda.

Muqdisho, 7 Setember 1967.

**Abirashiid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha
**Mohamed Haji Ibrahim Egal**

Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga
**Mohamed Ali Daar**

Waa la arkay oo la diiwan gelin – diiwan lamba. 1 bogga lamba. 31

Muqdisho, 10 Setember 1967.

Xisaabiyaha Guud

**Mohamed Ahmed Abdilleh**